


# DHOWAAN LAGAA HELAY SONKOROOW

Newly Diagnosed with  
Diabetes - Somali



**DIABETES UK**  
KNOW DIABETES. FIGHT DIABETES.



**Ku dhawaad 90% dadka  
uu ku dhaco sonkoroowgu  
waxay qabaan Nooca 2.**

**Ku dhawaad 8% dadka  
uu ku dhaco sonkoroowgu  
waxay qabaan Nooca 1.**

**Qiyaas ahaan 2% dadku  
waxay qabaan noocyo  
dhifka ah ee sonkorow.**

**Markii laguu sheego inaad qabtid  
sonkorow wuxuu ahaan karaa wax  
naxdin badan leh. Barashada sida  
loola noolaado xanuunka ayaana  
dhib noqon karta.**

Waxaa laga yaabaa inaad dareemeyso dhammaan noocyada shucurta. Tani gebi ahaanba waa wax caadi ah. Laakiin waxaan diyaar u nahay inaan ku taageerno talaabo kasta.

Waxaan ku siin doonnaa macluumaad faah-faahsan, taageero iyo talo si aan kugu caawinno inaad dareento kalsoonida maamulka xaaladdaada. Waxaan xitaa kula xiririn karnaa dad ku jiro isla xaaladdaada. Adiga iyo qoyskaaga ayaan ka caawin doonna fahamka iyo maamulka waxa dhacaaya, si aad nooloshaada ugu raaxeysato.



# OGOOW XAQIIQOOYINKA

## Waa maxay sonkorowgu?

Sonkorowgu waa xaadal markii jirkaaga uu soo saari karin insulin, uusan soo saarin qiyas ku filan, ama waa markii insulin'ka uusan si fiican u shaqeynin. Insulin'ka wuxuu jirkaaga ku caawiyaa isticmaalka sonkorta, oo sidoo kale loo yaqaano gulukoska, ku jiro dhiiggaaga si uu kuu siyo tamar. Haddii aadan qabin qiyas sax ah ee insulin, ama haddii insulin'kaaga uusan si fiican shaqada u sameynin, heerka sonkorta dhiiggaaga ayaa kacsanaan doonta. Kan ayaa kugu ridaaya xanuun daran.

Sonkorowga waa cudur aad u xun. In ka badan 4.9 malyuun qfoood oo ku nool dalka UK ayaa la nool sonkorow. Waxaa sidoo kale kle 850,000 oo la nool sonkorowga nooca 2 oo aan wali laga baarin. 13.6 malyuun oo kale ayaa halis ugu jira inuu ku dhaco sonkorowga Nooca 2-aad.



## Waa maxay nooca aad adiga qabtid?

Takhtarkaaga ama kaaliyahaada caafimaad ayaa kuu sheegi doonta nooca sonkorow ee aad qabtid. Waxaa jira labo nooc oo waawayn, oo loo yaqaano nooca 1 iyo nooca 2. Waxaa sidoo kale jira sonkorowga uurka (sonkorow kugu dhici kara marka aad uurka leedahay). Waxaa jira qaar kale, oo noocyada dhifka ah ee sonkorowga sidoo kale.

## Nooca 1-aad

Nooca 1 waa kan ugu badan ee laga helo carruurta iyo da'yarta, laakiin waxaa qofka laga heli karaa asagoo qof wayn ah. Wuxuu ku biloowdaa si lma filaan ah wuuna kasii daraa si degdeg ah. Dadka qaba Nooca 1-aad ee sonkorowga si dabiici ah jirkooda uma soo saari karo insulin. Qofna ma oga waxa sababo, laakin xiriir lama lahan buurnaanta oo iminka ma ahan cudur laga hortagi karo.

## Nooca 2-aad

Badanaa dadka qaba sonkorowga waxay qabaan Nooca 2-aad. Noocaan caadi ahaan wuxuu bilowdaa waqtidambe ee nolosha, inkastoo mararka qaar laga helo carruurta. Sonkorowga Nooca 2 ayaa ka faafid yar sonkorowga nooca 1. Waxaa laga yaabaa inuu kugu dhaco nooca 2-aad ee sonkorowga sababo ah dhaxal qoys, da' ama asalkaaga jinsiyeed ayaa kordin karo halistaada. Waxaa xitaa laga yaabaa inuu kugu dhaco nooca 2 ee sonkorowga haddii miisaankaaga xad dhaaf yahay. Hase yeeshi, waxaa jirta cadayn xoogan, oo ah in dadka qaar ay xanuunkooda sonkorowga nooca 2 ay yareeyaan ayagoo iska jaraaya cayilka.

## Noocyada kale

Qiyas ahaan 2% dadku waxay qabaan noocyada kale ee sonkorow. Kuwaani waxaa ka mid ah noocyada badan ee sonkorow hal hidde-side ku dhaco, kaasoo ah sonkorow ka dhasha isbadelka halka hide side, sonkorowga xirir la leh cudurka sistik fibrosis, iyo sonkorowga sababo xaalado caafimaad oo aan caadi ahayn.

# DARYEEL NAFTAADA


**In lagaa helo sonkoroow ayaa  
ka dhignaan karta inaad qaadato  
daawooyin, inaad u baahato badelida  
waxa aad cunto iyo inaad kordhiso  
jimicsiga jidhka.**

Arintaan ayaa ku murjin karta. Laakiin dad badan ayaa sheega inay la qabsadeen isbadellada ayna isku dheelitiraan noloshooda. Raacida qaab nololeed caafimaad leh ayaa kaa caawinaaya kordhinta tayada noloshaada kuna siinaaya caafimaad qab. Tani way ka dhigan tahay inaad cunto fiicaan cunto, aad jimicsiga wado aadna iska joojiso sigaarka, haddii aad sigaar cabto.

## Cunto fiican cun

Marka uu kugu dhaco sonkorowga waxaa aad muhiim u ah inaad cunto cunno caafimaad leh, laakiin waxaad welli ku raaxeysan kartaa cuntooyinka noocyada badan. Waxaad heli kartaa talo takhusus leh oo ku saabsan noocyada cuntada caafimaadka I eh ee adiga kuu habboon adoo u tagaaya dhakhtarka cuntada. Ka codso dhakhtarkaaga ama kalkaalsada inay kugu xирто.

Talo, habab cunto loo kariyo iyo maclumaad ka badan ee ku saabsan cunidda cunto fiican waxaad ka heli kartaa [diabetes.org.uk/eat-well](http://diabetes.org.uk/eat-well).



## Jimicsi joogto ah samee

Qof walba ayuu u fiican yahay firfircoonaanta jireed, laakiin gaar ahaan haddii aad qabtid sonkorow. Inaad jimicsi joogto ah samayso aaya ka caawinaysa jidhkaaga inuu si fiican u adeegsado insulin-ta uuna yareeyo khatartaada qaadista dhibaatooyinka sonkorowga sida istarooga ama wadna xanuunka. Dadka wayn badankood waa inay sameeyaan ugu yaraan 30 daqiqi ee jimicsi dhexdhexaad ah shan jeer usbuuciba. Weydii takhtarkaaga ama kaaliyaha caafimaad jimicsiga adiga kuu fiican.

Haddii aad raadinayso qaabab aad jimicsi ku samayso, waxaan haynaa tiro badan oo ilaha lacag la'aantaa ah, ayna ku jiraan muuqaallada jimicsiga, aynka tilmaamaha iyo fikradaha awood kasta.

Booqo [diabetes.org.uk/new-move-more](http://diabetes.org.uk/new-move-more) si aad u hesho xog dheeraad ah.

Ama ka wac laynkeena caawimaada **0345 123 2399** si aad ula hadasho mid kamid ah la taliyaasheena tababaran.



## Jooji sigaar cabidda

Sigaar cabidda qof walba ayuu u daran yahay. Laakiin haddii sigaar cabto adigoo sonkorow qaba, waxaad xittaa kordhin kartaa halistaada dhibaatooyinka sonkorowga, ayna ku jiraan wadna xanuunka, istarooga iyo dhibaatooyinka ku dhaca cagahaaga. Sigaar cabistu wuxuu xitaa sababi karaa dhibaatooin caafimaad kale oo aad u xun.

Inaad joojiso waa wax dhib adag, laakiin qasab maaha inaad keligaa samayso. Xaqiicdii, si kasta oo aad doorato inaad u joojiso, waxay u badan tahay inaad joojiso marka aad taageero helayo.

## Meesha aad ka helayo taageero

- Wac laynka Caawimaada ee Smokefree ee NHS oo aad ka helayo 0300 123 104.
- Kala hadal Dhakhtarkaaga Guud (GP) ama kalkaalisada caafimaadka joojinta sigaarka.
- Booqo [www.nhs.uk/better-health/quit-smoking](http://www.nhs.uk/better-health/quit-smoking) si aad u hesho talo dheeri ah oo ku aadan daawooyinka kaa caawin kara joojinta, ayna ku jiraan baxnaaninta joojinta nikootiinta iyo daawooyinka dhakhtar qoro.
- Soo degso abka lacag la'aanta ah ee NHS Quit Smoking.

## **Maamulka sonkorowgaaga**

Takhtarkaaga ama kaaliyahaada caafimaad ayaa kaala hadli doono sida loo maamulo sonkorowgaaga. Ayadoo ku xiran nooca sonkorowga aad qabtid waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad qaadato kaniini ama cirkadeynta insulin, ama labaduuba. Waxaa laga yaabaa inaad isticmaasho irbidda yar ee insulinka ama bamka. Waxaa muhiim ah inaad cunto caafimaad leh cunto aadna jimicsi samayso.

Qof walba wuu ka duwan yahay midka kale oo marmar muddo ayej ku qaadan kartaa ilaa aad ka ogaato wixii kuu fiican. Waxaad u baahan kartaa inaad beddesho daaweyntaada waqtii ka dib. Takhtarkaaga ama kaaliyahada ayaa sii wadi doono inuu kula shaqeeyo si loo helo daaweynta adiga kuu habboon.

Hubi inaad fahamto waxa aad u baahan tahay inaad sameyso iyo inaad ku faraxsan tahay sameytiisa. Waxaa laga yaabaa inaad rabtid inaad sameyso ballan kale si dib laguu macneeyo wax walba oo aad hubiso inaad hayso dhammaan macluumaadka aad u baahan tahay.



# **WAXAAN DIYAAR U NAHAY INAAN KU CAAWINO**

## **Macluumaad iyo taageero**

Waxaan qabnaa taaggerida iyo macluumaadka aad u baahan tahay si lagugu caawiyo maamulka fiican ee sonkorowgaaga. Waxaa jiro habab kala duwan oo badan oo aan kuu caawin karno.

## **Booqo webseedkeena**



Boggeena internetka wuxuu leeyahay macluumaad iyo talooyin wax ku ool ah ee quseeya la nooolaanshaha sonkorowga, laga bilaabo daryeelka iyo daaweynta ilaa cunto cunidda iyo ku nololka si caafimaad ah iyo garashada cudurkaaga. Waxaad xitaa ka ogaan kartaa taageerida laga heli karo xaa faddaada.

Booqo [diabetes.org.uk](http://diabetes.org.uk).

## La hadal khadkeena caawinta

La taliyaasheena sida gaarka ah u tababaran waxay ku siin karaan macluumaad iyo talo wax ku ool ah ee ku saabsan dhinacyo badan ee la noolaanshaha sonkorowga, ay ku jirto cuntada, jimicsiga, shaqada, baabuur wadidda iyo socdaalka.

Waxaan halkaan u joognaa si aan uga jawaabno su'aalahaada, ku siinno taageero ama waan nala sheekaysan kartaa markaad u baahato inaad la hadasho qof aqoon ku leh sonkorowga.

Soo wac khadkeena **0345 123 2399**, Isniin ilaa jimco, 9 subaxnimo ilaa 6 habeenimo, ama iimayl u soo dir [helpline@diabetes.org.uk](mailto:helpline@diabetes.org.uk).



## Buug-yarayaasha Sonkorowga

Waxaad buug-yarayaasheena wax ku oolka ah ka dalban kartaa ama kasoo degsan kartaa dukaankeena oonlayinka ah oo aad ka helayo [shop.diabetes.org.uk](http://shop.diabetes.org.uk).



## Taageerida dadka qaba sonkorowga

Waxaad mar walba taageero iyo talo ka heli kartaa kumaakun qfood ee qaba sonkorowga adigoo ku biiraaya Madalka Taageerida Sonkorowga UK (Diabetes UK Support Forum). Jaaliyadeena internetka wuxuu isku keenaa dadka qaba noocyoo kala duwan ee sonkorow si ay isla qaybsadaan waayo aragnimadooda, weydiyaan su'aalo, iyo helaan macluumaad iyo talo ku saabsan mawduucyo badan oo kala duwan.


Tag [forum.diabetes.org.uk](http://forum.diabetes.org.uk).



## Iska diiwaan geli casharada oonlaynka ah ee bilaashka ah

Goobteena wax barashada cusub waa hab internet ee bilaash ah ee lagu barto sonkorowga Nooca 1-aad ama Nooca 2-aad markaad waqtii u hesho. Hel xog iyo talo, kugu haboon, iyo sidoo kale muuqaallo, su'aalo iyo jawaabo iyo agab isdhexgal ah.

Waxaad ka heli kartaa barta [diabetes.org.uk/learningzone](http://diabetes.org.uk/learningzone).



# KU SOO BIIR DIABETES UK

Xubin ka noqo oo waxaad heli doontaa faa'iidoyin badan, oo ay ku jirto majalladeena iyo warar casri ah ee ku saabsan daaweynta casriga ah ee sonkorowga, daryeelka iyo cilmi-baarista.

Waad ku biiri kartaa adigoo booqanaaya [diabetes.org.uk/join](https://www.diabetes.org.uk/join) ama wacaaya **0345 123 2399**.

Ka raadi **Diabetes UK** baraha Facebook, Twitter, YouTube, Instagram iyo TikTok



The British Diabetic Association wuxuu ku hawlalaa magaca Diabetes UK, waa urur samafal ku diiwangan England iyo Wales (no. 215199) iyo Skotland (no. SC039136). Oo ah shirkad dhamaystiran oo ka diiwaan gashan Wadanka Ingiriska iyo lambarkeeda diiwaankuna yahay 00339181 xafiskeeda diiwaan gashana ku yaalo Wells Lawrence House, 126 Back Church Lane, London E1 1FH © Diabetes UK 2022.

Waxaa la daabacay 2022. Koodhka Daabacaada: 10125EINT